

# Employment Support Professional (Xirfadlaha Taageerada Shaqada)

## Waxaad Ka Fekertaa Shaqo ah Daryeelid oo leh Mustaqbal

*Ku raaxeyso shaqo ah daryeelka  
caafimaadka oo ah mid wax weyn  
ka beddeleysa noloshada dadka*



Shaqaalahan waxay ku taageerayaan dadka naafada ah in ay helaan shaqo ay ku sii dhex haysan karaan bulshada gudaheeda. Waxaa laga yaabaa in aad si fiican u jeclaan doonto shaqadan haddii aad ka hesho in aad la kulanto dad cusub oo aad ka wada shaqeyneysaan sida xal loogu helayo shaqooyinka.

**SHAQOYINKA KALE EE LA MIDKA AH DARYEELKA IYO CAAWINA:** Shaqo Diyaariye, Takhasuslaha ama La-taliyaha Shaqada, Talabixiye Shaqada, Tababare Shaqada, Adeegaha Ka-gudbinta Iskuulka ee Aadista Shaqada, Takhasuslaha Kobcinta, iyo in kuwa kale oo badan.

### WAXBARASHO

Shahaadada dugsiga sare ama tan dadka waaweyn ayaa caadi ahaan looga baahan yahay qofkii u shaqeynaya sidii Xirfadlaha Taageerada Shaqada, laakiin waxaa jiri kara waxyaabo ka reebban. Goobta shaqada weydii shaqaalaha ay rabaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada.

### LEYSANKA SHAQADA

Ma jiraan wax leysan daryeele ah oo la isaga baahan yahay. Shaqooyinka qaarkood ayaa la iska rabi karaa leysanka darawalnimada. Goobta shaqada weydii shaqaalaha ay rabaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada.

### AQOONSIGA SHAQADA

Caadi ahaan, aqoonsi looma baahna, laakiin goobaha shaqada ayaa laga yaabaa in ay u baahdaan caddeynta aqoonsi ah shaqooyinka qaarkood. Goobta shaqada weydii shaqaalaha ay rabaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada.

Si aad ugu takhasusto qeyb gaar ah oo la xiriirta taageerada shaqooyinka, sida Shaqaaleynta Gaar Ahaaneed, tababarada shahaado aqoonsiyeed oo urur laga qaato sida Association of Community Rehabilitation Educators (Ururka Bareyaasha Baxnaaninta Bulshada ama ACRE) ama si aad u hesho Certified Employment Support Professional (Shahaadada Aqoonsiga Taageerada Shaqaaleynta ama CESP) ayaa loo baahan karaa ama waxtar leh.

### BAARITAANKA SHAQAALAHA

Dadka doonaya in ay u shaqeeyaan sidii Xirfadlaha Taageerada Shaqada waa in ay ay soo maraan oo la soo baaro taariikhdooyii hore iyo dambiyada sida uu dhigayo sharciga gobolka.

### AQOONTA LUUQADAHA

Dadka hadda barta afka Ingiriiska ee ku hadla luuqado kale oo aan ahayn afka Ingiriiska waa ay qaban karaan shaqadan. Aqoonta afka Ingiriiska ayaa laga yaabaa in la isaga baahdo shaqooyinka qaarkood, laakiin codsadeyaasha ku hadli kara luuqadaha badan ayaa markaas ka dib la tixgelin karaa. Inta lagu jiro wareysiga shaqada, goobta shaqada weydii waxa ay rabaan iyo haddii ay u baahan yihiin luuqad aad ku hadli karto markaad shaqeyneyso.

### KOBCINTA SHAKHSIYEED

Waxaa jira fursado ah kobcid shakhsiyeed ka dib marka uu qof yeesho khibrad badan oo ah Xirfadlaha Taageerada Shaqada. Marmar ayey shaqadu bixineysaa kharashka tababarka aqoonsiga ee lagu helo lacagta badan. Weydiiso goobta shaqada fursadaha koboca shaqada inta lagu jiro wareysigaaga shaqada.

# Xirfadlaha Taageerada Shaqada

WAA SOCOTAA

## MUSHAARKA

Dadka u shaqeeya sida Xirfadlaha Taageerada Shaqada ee Minnesota waxay badanaaba qaataan \$15 ilaa \$22 saacaddii. Mushaarku waxa uu ku saleysan yaha meesha looga nool yahay gobolka.

## HAWLAHA SHAQADA MAALINTII

- In la fududeeyo raacista dad shaqeynaya iyo in la tijaabiyo khibradaha shaqooyinka kala duwan ee dadka naafada ah.
- In la fududeeyo kooxaha taageerada waxbarashada shaqada.
- In la isku duwo booqasho ah meheradaha dadweynaha si wax looga barto shirkado kala duwan, alaabo, adeegyo iyo fursado shaqo.
- In la keeno macluumaadka waxbarashada iyo caawimaad ah la-talinta shaqooyinka/xirfadaha xiisa gelin kara qofka taageerada helaya.
- In la keeno caawimaad ah raadinta iyo taageerada shaqada.
- In la soo uruuriyo macluumaadka ah manfacyada uu helayo qofka taageerada helaya iyo in la go'aamiyo sida manfacyadaasi ula falgalayaan shaqada.
- Caawinta gorgortanka iyo dhammeystirka shuruudaha shaqada.
- In la isku caawiyo codsiyada shaqada, arjiga shaqada iyo waraaqda la socota arjiga.
- In meheradaha lagala xiriir fursadaha shaqo ee ay hayaan.

- In la isku tababar oo la isku tusaaleeyo xirfadaha daahsoon ee goobta shaqada, lebbiska habboon, nadaafadda shakhsi ahaaneed iyo hagaajinta timaha.
- In la sameeyo tababar shaqo iyo tusaaleyn si loo xoojiyo oo loo ambaqaado xirfadaha shaqada ee lagama maarmaanka ah, dabecadaha iyo xiriirada shaqaalaha.
- In la sameeyo la-talin iyo taageero la xiriirta shaqada, sida caawinta fahamka mushaarka iyo saameynta manaafacaadka.
- In lagu tababaro oo la tusaaleeyo qofka gaadiidka shaqada lagu aadayo.

## SIDA LAGU RAADSADO SHAQADA XIRFADLAHA TAAGEERADA SHAQADA

Kala hadal shaqaalaha xafiiska CareerForce ee goobta kuugu dhow:

- Booqo [CareerForceMN.com/locations](https://www.careerforcemn.com/locations)
- Soo garaac 651-259-7500

Toos ula xiriir goobaha shaqada:

- Ka raadso shaqada [CareerForceMN.com/job-search](https://www.careerforcemn.com/job-search) Xirfadlaha Taageerada Shaqada ama shaqooyinka kale ee shaqada ee ah shaqo la mid ah sida ku qoran bogga 1aad



[CareerForceMN.com/CaringCareer](https://www.careerforcemn.com/CaringCareer)

651-259-7500 – Turjubaan ayaa loo diyaarinayaa qofkii naga soo socda.